



## Xeerarka Artists at the Center 2026-2027

### Dulmarka Deeqaha

Mashruuca Fanaaniinta Seattle Center waa wada shaqayn sanado badan socota una dhaxeysa [Seattle Office of Arts & Culture](#) (Xafiiska Fanka iyo Dhaqanka ee Seattle) iyo [Seattle Center](#) (Xarunta Seattle), oo taageero ka helaya [Uptown Arts & Culture Coalition](#) (Iskaashatada Dhaqanka iyo Fanka ee Aptown) iyo jaaliyadaha ku teedsam Seattle Center. Barnaamijkan waxaa suurtageliyay deeqda dheefaha bulshada oo 10-sano ah oo laga helo [Climate Pledge Arena](#) iyo [Seattle Kraken](#), laga so bilaabo 2021.

[Fanaaniinta Seattle Center](#) waxay maalgelisa fannaaniinta shaqsigaa ah, ururada farshaxanka, kooxaha bulshada, iyo ururada si ay u horumariyaan oo ay uga soo bandhigaan bandhigyada sanadka oo dhan Xarunta Seattle. Noocyada farshaxanka waxaa ku jiri kara muusig, qoob ka ciyaar, masrax, bandhigyo, iyo shaqo qaabab kala duwan ah. Soo-bandhigyada waxaa la qorsheyn doonaa inta u dhaxaysa Oktoobar 2026 iyo Sebtembar 2027. Ka qaybgalayaasha la xushay waxay heli doonaan mid ka mid ah \$2,000, \$4,000, ama \$6,000 oo ah maalgelin ku salaysan fannaaniinta/kooxda cabbirka iyo baaxadda shaqada. Abaalmarin helayaasha xilli ciyaareedka hadda socda (2025-2026) xaq uma laha inay codsadaan xilli ciyaareedka soo socda ee 2026-2027.

Wixii macluumaad iyo caawimo ah oo ku saabsan codsiga, u-qalmitaanka ama taageerada farsamada ee khadka tooska ah, fadlan la xiriir Zach Frimmel, Maareeyaha Mashruuca ee Artists at the Center, lambarka 206-963-9226 ama [Zach.Frimmel@seattle.gov](mailto:Zach.Frimmel@seattle.gov).

**Waxaan noo jooga turjubaano kugula hadli kara luqadaada, kuwaaso ay ku jiraan Luqadda Calaamadaha Ameerika (muuqaal ahaan).** Kaliya na soo wac oo noo sheeg luqadda aad ku hadasho. Fadlan sug qaddar yar inta aanu raadineyno turjubaan ku soo biira wicitaanka.

### Codsiga (Arjiga)

[Ku Codso qaabka khadka](#) iyadoo la adeegsanayo bogga deeqaha ee Magaalada Seattle.

Haddii aadan haysan kombiyuutar ama internet, la xiriir Maareeyaha Mashruuca sida ugu dhakhsaha badan. Waxay u baahan yihiin ugu yaraan laba (2) toddobaad ka hor taariikhda kama dambaysta ah ee codsiga si ay u bixiyaan caawimaad.

### Taariikhda ugu danbaysa ee la codsan karo

Talaado, Abriil 21, 2026, 5 galabnimo (Baasifigga)

Fadlan u ogolow waqti ku filan si aad u dhammaystirto oo aad u soo gudbiso codsigaaga. Codsiyada la soo gudbiyay ka dib 5 pm (Pacific) waqtiga kama dambaysta ah lama aqbali doono.

## U-qalmitaanka

Waxa aad xaq u leedahay inaad codsato deeqdan haddii aad buuxiso shuruudaha soo socda:

- Waxaad tahay qof, urur, ama koox bulsho oo si joogto ah ugu soo bandhiga farshaxanka iyo dhaqdhaqaaqyada ku salaysan dhaqanka gudaha Seattle.
  - Waxaa laguugu weydiin doonaa arjiga inaad wadaagto faahfaahinno ku saabsan bandhigyadaadii ugu dambeeyay ee Seattle.
- Waxaad ku nooshahay King County ama King County aan lagu darin magaaloyinka ee gudaha gobolka Washington.
  - Ururada iyo fanaaniinta shaqsiya ah ee matala bulshooyinka sida aadka ah uu u saameeyay cadaadiska nidaamka oo ay ku jiraan dadka dakhligoodu hooseeyo, dadka naafada ah, bulshooyinka soogalootiga iyo qaxootiga, iyo bulshooyinka midabka leh ayaa lagu dhiirigelinayaa inay codsadaan.
- Waxaad haysataa lambarka Aqoonsiga Canshuuraha ee Federaalka (Social Security Number, ITIN, ama Lambarka Aqoonsiga Shaqaalaha).
  - Kooxaha codsanaya loogama baahna inay noqdaan 501 (c) (3) urur aan faa'iido doon ahayn, sidoo kale loogama baahna inay isticmaalaan wakiil maaliyadeed.
- Waxaad u soo gudbin kartaa hal codsi wareeg kasta barnaamijkan.
- Codsadayaal badan uma soo gudbin karaan codsiyo kala duwan Barnaamij isku mid ah.
- Dadka la guddoonsiiyay xilli ciyaareedka hadda socda (2025-2026) *xaq uma laha* inay codsadaan xilli ciyaareedka 2026-2027.

## Maalgelinta

Waxaad codsan kartaa heerarka maalgelinta soo socda:

- Abaalmarin \$2,000 ah (badanaa 1-2 qof oo sameeya bandhig faneed), iyo taageero wax soo-saar oo \$780 ah oo ka timid Xarunta Seattle.
- Abaalmarin \$4,000 ah (badanaa 3-5 jilaa), iyo \$1,420 taageero wax soo-saar ah oo ka timid Xarunta Seattle
- Abaalmarin \$6,000 ah (badanaa 6+ jilaa), iyo \$1,865 taageero wax soo-saar ah oo ka timid Xarunta Seattle

## Kulamada Macluumaadka

Baro wax badan oo ku saabsan barnaamijka iyo sida loo gudbiyo codsigaaga ugu fiican.

Kulanka Macluumaadka 1-aad (Khadka lagu qaban)

Khamiis, Maarso 19, 5-6:30 galabnimo (Baasifigga)

Khadka: [Microsoft Teams](#)

[Xaqiiji ka-qaybgalka \(RSVP\) illaa March 19](#)

Kulanka Macluumaadka 2 (Khadka)

Sabti, Abriil 11, 10-11:30 subaxnimo (Baasifigga)

Khadka: [Microsoft Teams](#)

[Ka Jawaab Casumaadda ilaa iyo Abriil 11](#)